

Su'aalaha Soo Noqnoqda ee ku saabsan nidaamyada dacwadaha ee qof ahaan iyo kuwa isku-dhafka ah

BIIA wuxuu dhinacyada siiyaa fursad ay kaga qaybgalaan dacwadaha lagu qabto meel kaloo fog oo uusan qofka joogin, kuwa uu qofku shakhsi ahaan uga qaybgalayo, ama kuwa isku dhafka ah.

Ereyadan maxaa loola jeedaa?

- **Meel kale kal dhacaya:** dhammaan ka-qaybgalayaasha waxay kaga soo qaybgalayaan aaladda Zoom ama telefoon.
- **Shakhsi ahaan:** dhammaan ka-qaybgalayaasha waxay shakhsi ahaan uga soo muuqanayaan qolka dhageysiga.
- **Isku-dhaf:** ka-qaybgalayaasha qaarkood waxay shakhsi ahaan uga soo muuqanayaan qol dhageysi oo uu garsoore joogo iyadoo dadka kalena ay ka soo qaybgalayaan iyaga oo meel kale oo fog jooga.

Halkeen u qorsheysan karaa dhageysiga shakhsi ahaaneed ama midka isku-dhafka ah?

Xarumahan BIIA ee soo socda ayaa waxay martigelin karaan dhageysiyada shakhsi ahaaneed ama isku-dhafka ah: Everett, Seattle, Lakewood, Olympia, Yakima, Spokane, iyo Richland. Dhageysiyada isku-dhafka ah ee telefoonka ka dhacaya ayaa waxaa lagu qaban karaa Moses Lake iyo Vancouver. Fadlan muuji habka dhageysiga ee aad rabto in shirka kuu qorsheysan/ballansan loo qabto. Si kastaba ha ahaatee, haddii aanan heli karin qol dhageysi, garsooraha waxaa uu dhageysiga dacwadaada ku qaban doonaa aaladda Zoom ama telefoonka.

Dhageysiyada ka dhacaya goobaha aan BIIA ahayn.

Haddii aad codsato dhageysi shakhsi-ahaaneed oo ka dhacaya degmo aanan xafiis ku lahayn, waxaan isku-dayeynaa in aan kuu fulinno codsigaaga. Si kastaba ha ahaatee, xarumaha waxaa laga yaabaa in aanan la heli karin. Sidaa daraadeed, waxaa lagaa codsan karaa (1) in aad goobta iska dhaafto si aad noogu oggolaato in aan kuugu qabanqaabinno dhageysigaaga ka dhacaya xafiiska BIIA, ama (2) in aad oggolaato dhageysi ka dhacaya telefoon ama Zoom. Dhageysiyada isku-dhafka ah lagama heli karo xarumo aan ahayn kuwa BIIA.

Maxaa dhacaya maalinta dhageysiga?

Qof walba ee doonaya in uu ka qaybgalo waa in uu isaga is-baaraa ka hor inta uusan imaan xafiiska BIIA. Qof walba ee qaba astaamaha lagu garto COVID ama uu dhowaan ku dhacay, ama si kale u xanuunsan, waa in uusan dhismaha soo galin. Markhaatiyada waa in ay ku wargeliyaan qofka dhaarta u ballamiyey in aysan imaan karin. Dhinacyada waa in ay ku wargeliyaan kaaliyaha garsooraha. Garsooraha ayaa go'aamin doonaa sida dhageysiga uu u socon doonno. **Sii socoshada ma ahan in ay noqoto tallaabada xigta.**

Miyuu garsooruhu dad wax ka weyddiin doonaa xaaladda tallaalka?

Maya.

Af-xirro ma loo baahan yahay?

Maya, laakiinse waxaan ku dhiirrigelinaynaa qof walboo doonaya in uu af-xir xirto in uu soo xirta.

Shirarka Dhexdhexaadinta ama Heshiisiinta

Shirarka dhexdhexaadinta ama heshiisiinta ayaa caadi ahaan lagu qabtaa telefoonka, laakiinse waxaa loo qaban karaa qof-ahaan, ama aaladda Zoom-ka, ama hab isku-dhaf ah haddii dhinacyadu ay isku raacaan. Iyadoo uu go'aanku leeyahay garsooraha, ayaa shirarka waxaa loo qaban karaa qaab qof ahaaneed, aaladda Zoom, ama hab isku-dhaf ah marka uu dhinac kasta codsado (tusaale ahaan, habka ugu habboon ahaan). Haddii aad daneynayso dhexdhexaadin qof ahaan loo qabto, Zoom lagu sameeyo, ama mid isku-dhaf ah, fadlan sida ugu dhakhsiyaha badan ee suuragal ah ula soo xiriir cidda jadwalka ama ballamaha u sameysa garsoorahaaga. Shirarka isku-dhafka ah laguma qaban karo xarumo aan kuwa BIIA ahayn.